

Sharchiyada Badqabka iyo Caafimaadka Shaqada ee Goobaha Shaqada Dawlada



Maine ayaa leh Sharciga Badqabka iyo Caafimaadka Shaqada kaasoo ka difaacaaya shaqaalaha gobalka, degmada iyo magaal-lada khataraha badqabka iyo caafimaadka ee goobta shaqada.

M.R.S.A. Farqada 26: Shaqaalaha iyo Shaqada



Loo shaqeeyaasha dawladu waa inay boorkaan ku dhajiyaan goobta shaqada meel ay shaqaaluhu si fiican u arki karaan.

Boorkaan ayaa looga heli karaa barta oonleenka ah si bilaash ah waxaana laga samaysan karaa nuqul: <https://www.maine.gov/labor/posters/>

Sidee laguu difaacayaa?

- ✓ Sida sharcigu qabo, loo shaqeyuhu waa inuu siiyaa goob badqab iyo caafimaad leh shaqaalaha.
- ✓ Si goos-goos ah, kormeerayaasha badqabka iyo caafimaadka oo ka socda Waaxda Shaqaalaha ee Maine ayaa imaan doona goobtaada shaqada si ay u xaqijiyaan in shirkada aad u shaqayso ay raacdoo Xeerarka Badqabka iyo Caafimaadka.
- ✓ Wuxaad xaq u leedahay inaad soo sheegto dhaawacyada iyo xanuunnada la xariira shaqada.
- ✓ Haddii aad aaminsan tahay in goobtaada shaqadu aysan amaan ahayn, adigga ama wakiilkaaga ayaa la xariiri kara Waaxda Shaqaalaha ee Maine kadibna codsan kara kormeer. Wuxaad codsan kartaa in magacaaga aan la sheegin.
- ✓ Loo shaqeeyaasha, shaqaalaha iyo wakiillada shaqaalaha ayaa raaci kara kormeeraha kujira shaqada kormeerka ee goobtaada.
- ✓ Loo shaqeeyyahaaga ayaa la dacwayn karaa lana ganaaxi karaa haddii xaalado badqab la'aan ah ama caafimaad daro ah laga helo goobta inta kormeerku socdo. Digniinaha waa in lagusoo dhajiyyaa goobta ama aaga goobta eeda loo haysto.
- ✓ Loo shaqeeyyahaagu waa inuu saxaa xaaladaha badqabka aan lahayn iyo kuwa caafimaad darada ah ee la ogaaday intii kormeerku socday.
- ✓ Loo shaqeeyaasha markale sameeya jabinta xeerka badqabka iyo caafimaadka ama jabiya sharciga si kas ah ayaa waajiji kara ganaax dhaqaale, dacwad madani ah, ama dacwado danbi.
- ✓ Lagaama cayrin karo shaqada ama laguma takoori kara sabab la xariirta inaad gudbisay cabashada badqabka ama caafimaadka ama aad soo sheegtay dhaawac ama xanuun goobta shaqada aad ka qaaday. Wuxaad Cabashada u gudbin kartaa Agaasimaha Laanta Heerarka Shaqaalaha 30 maalmood gudaood kadib marka xadgudubkaas dhaco.

Sida ku cad qorshe la ansixiyay Agoosto 5, 2015, ayna ansixiyeen Waaxda Shaqaalaha Maraykanka, Maamulka Badqabka iyo Caafimaadka Shaqada (OSHA), Gobalka Maine ayaa siinaaya difaacyada badqabka iyo caafimaadka shaqada shaqaalaha shaqooyinka dawlada ee dhammaan Gobalka.

OSHA ayaa kormeeri doona shaqada qorshehaan si loo xaqijiyo in oggolaansho joogto ah la haysto. Qof kasta ayaa gudbin kara cabasho la xariirta maamulka Gobalka ee qorshehaan una diri kara Xafiiska Heer Gobal ee OSHA, JFK Federal Building, Room E-340, Boston, Massachusetts 02203.

Taleefanka: 617-565-9860 | Fakiska: 617-565-9827.

Markaad soo sheegayso geerida saacadaha shaqada kadib/masiibada: 207-592-4501 ama iimeelka accident. bls@maine.gov.

Qofkee ayaad la xariiri kartaa si aad u codsato kormeer ama xogta badqabka iyo caafimaadka?

Maine Department of Labor
Bureau of Labor Standards
45 State House Station
Augusta, ME 04333-0045
207-623-7900

isticmaalayaasha TTY ha wacaan Maine Relay 711.

iimeelka: mdol@maine.gov
Webseedka: www.maine.gov/labor/bls